2020-08-25

REGION KRONOBERG

# Tijaabadada laga qaadaayo covid-19 ka socda

Waxaad adigu hadda iska qaadi kartaa si aad ugu eegto haddii aad hadda qabtid infegshan/caabuq uu keenay covid-19, waxa loo yaqaano baaritaanka PCR-ka. Waxaanu tijaabada ka qaadnaa kaliya qofka qaba calaamadaha u caadiga ah covid-19.

Calaamadaha u caadiga ah covid-19 waa:

- Xumad
- Qufac qallalan
- Daal
- Neeftoo ku dhibeysa
- Xanuun Murqaha
- Cune xanuun
- Madax xanuun
- Calool xanuun shuban wata
- Dareenka urka iyo dhadhanka oo kaa taga

Si tijaabo lagaaga qaado waa inaad calaamadaha laheyd ugu yaraan 24 saacadood, haddii kale waxa jirta halis aan infegshanka/caabuqa socda lagu ogaaneynin. Tijaabadu waa in la qaado maalinta labaad ilaa toddobo kadib marka calaamadahu kugu bilaabmeen, iyo ugu danbeyn maalinta tobnaad ee calaamadaha ugu horeeya kadib. Haddii tijaabada lagaa qaado 10 maalmood ka dib markaad xanuunsato, ayaanad badanaa fayras ku laheyn cunaha iyo sanka, sidaa daraadeed ayaanay tijaabadu ugu aheyn mid la aamini karro. Waxaas sidaa darteed aad heli doontaa su'aalo ku saabsan nooca calaamadaha ee aad leedahay iyo ilaa inta aad laheyd iyadoo uu daryeelka caafimaadku uu go'aaminaayo haddii aad buuxinayso shuruudaha qaadista tijaabada.

## Maxaan sameeyaa si tijaabada la iiga qaado?

Rugtaada caafimaadka kula soo xiriir telefoonka ama soo gal bogga xarunta caafimaadka ee 1177.se si aad ugu hesho macluumaad ku saabsan waxa ay tahay inaad sameyso. Ruggaha caafimaadka ee kala

duduwan waxay leeyihiin habab kala duduwan oo qaadista tijaabada. Qaadista tijaabadu waxay ka dhici kartaa gudaha goobta xarunta caafimaadka ama iyadoo la is tijaabinaayo halkaas oo aad heli doonto xirmada qaadista tijaabada iyo tilmaamaha sida loo qaadaayo tijaabada.

Xaaladaha calaamadaha xunxun leh, ee u baahan in shaqaalha daryeelka caafimaadku uu qiimeeyo, waa inaad la xiriirto daryeelka caafimaad ee caadiga ah ama rugta daryeelka caafimaadka.

## Maxaa carruurta khuseeya?

Baadhitaanka qofku iskiis isku sameeyo ayaa lagu isticmaali karaa carruurta badankood laga bilaabo da'da dugsiga iyo wixii ka sii weyn.

Xaaladaha aan wax baadhitaan ah la samaynin, ayaa la soo jeedinaya in carruurta iyo dadka waaweyni ay guriga sii joogaan ilaa inta calaamadahu ay sii socdaan iyo 48 saacadood oo dheeraad ah oo aan wax calaamado ah la laheyn. Haddii ilmuhu uu wali leeyahay calaamado khafiif ah, sida qufac qallalan iyo sanka oo duuf ka da’aayo, toddobo maalmood ka dib markii uu xanuunsadey, ayuu ilmahu dugsiga iyo waxqabadyada kale ku laaban karaa xitaa haddii aan wax baaritaan ah la sameynin.

Marka laga hadlaayo carruurta ugu yar yar tusaale ahaan, kuwa ku jira xansaanada carruurta, waxa loo soo jeedinayaa inay marka hore ee ay jiran yihiin guriga sii joogaan, iyagoon aan wax tijaabo ah laga qaadin. Waxa la soo jeedinayaa in carruurta xannaanada dhigata, ay sidoo kale, ku soo laaban karaan marka 48 saacadood ay ka soo wareegtey iyadoo aan wax calaamado ah la laheydn, ama haddii calaamado khafiif ah ay sii joogaan toddobo maalmood ka dib markii ay jiradeen. Carruurta aadka u yaryar waxa loo baahan yahay in tijaabada laga qaado sanka xagiisa danbe, taas oo ah mid aan raaxo badneyn oo xanuun badan. Maaddaama oo carruurta yaryar ay badanaa leeyihiin calaamado fudud oo aanay una muuqan inay gacan ka geystaan faafida cudurka, ayaanay tani tahay wax aan loo baahneyn in la sameeyo. Haddii aad weli sii dooneyso in ilmahaaga baaritaan loo sameeyo, la xiriir rugtaada caafimaadka markaas oo aanu arika kiis kiis ugu eegi doono.

## Waa imisa qiimaha tijaabadu?

Tijaabadu waa u bilaash qofka bukaanka, sida waafaqsan sharciga cudurada faafa ee Iswidhan.

# Goorma ayaan jawaabada helayaa?

Natiijooyinka baaritaanku waxa ay ku so baxaysaa 1-2 maalmood gudahood. Waa inaad adigu eegto jawaabta, sidan ayaad sameynaysaa:

1. Aad bogga Jawaabta Tijaabada Fayruska Korona.
2. Gali lambarka sumadda goobta "Din kod" oo guji "Jawaabta tus"

Haddii aanad jawaabta tijaabada helin muddo 3 maalmood gudahood ah, la soo xiriir xarunta caafimaadka ee dalbatey/qaaday tijaabada. Haddii ay dhamaadka todobaadka tahay/maalmaha fasaxa, sug ilaa maalinta xigga ee maalmaha shaqada.

Haddii ay jawaabtaadu tahay boositif/waa lagaa helay covid-19, ayay kula soo xiriiri doonaan shaqaalaha caafimaadku 1 illaa 3 maalmood oo shaqo gudahooda jawaabta tijaabada ka dib.

Haddii ay natiijada tijaabada negatif tahay/aan lagaa helin, ayaan markaa wax xiriira kale oo daryeelka caafimaadka oo covid-19 khuseeya aan loo baahneyn. Maadaama oo ay yimaadaan jawaabo negatif beena ah iyo si loo dhimo halista faafitaanka infegshanada/caabuqyada kale ee hawo-mareenka, waa inaad ka joogtaa, shaqada, xannaanada ama dugsiga ilaa inta aanad calaamado laheyn.

Haddii dhibaatooyinkaagu ka sii xumaadaan/daraan ama soo laabtaan, ayaad u baahan kartaa inaad tijaabo cusub iska qaado, la xiriir daryeel bixiyahaaga.

# Markaad sugeyso jawaabta

Markaad sugeyso natiijada baaritaanka ayaa laguu arkaa inaad faafin karto:

- Guriga joog oo iska ilaali la kulanka dadka kale oo aan ka ahayn kuwa aad guriga la wadaagto. Waa in aanad shaqada ama dugsi aadin ama meelo kale oo ka baxsan guriga.
- Isku day inaad masaafada ugu yaraan 1-2 mitir ah u jirsatid dadka aad la nooshahay, tusaale ahaan inaad adigu qolkaaga gaarka joogto oo isla markaana aanad dadka kale wax la cunin. Haddii ay suurtagal tahay, waa inaad haysato qol hurdo/jiif oo kuu gaar ah oo anad musqusha la wadaagin.
- Aad uga taxadir nadaafadaada gacmaha, badanaa gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo.
- Ku qufac oo ku hindhiso xusulkaaga ama masarka la iskaga siimiyo.

- Gaadiidka dadweynaha ha ku safrin.